MMHS1

Ha badiyo

12/01/2014

Waan ka qabtay mooshinkan

12/01/2014

**JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA**

DATE: 09 JANAURY 2014

**KU:** **GUDOONKA BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**OG:** **RAIISUL WASAARAHA SOOMAALIYA MUDANE**
**C/WELI SH. AXMED MAXAMED**

**UJ:** **XUBNIHII XILKA LAGA QAADAY EE XUKUUMADII R/W SAACID**

Mudane Gudoomiye,
Anigoo ah Xubnaha Xildhibaanadda Barlamaanka Federaalka Soomaaliya ee hoos ku saxeexan waxaanu gudoonka Barlamaanka halkan ugu soo gudbinaynaa Mooshin aanu kaga soo horjeedno in xukuumadda cusub lagu soo daro xubnihii golaha wasiiradda ee xukuumadii hadda xilka laga qaaday ee Mudane Saacid.

Mudane Gudoomiye,
Sida la wada ogyahay, Barlamaanka Soomaaliyeed wuxuu codka kalsoonida kala noqday xukuumadii Saacid 01 December 2013 ka dibna markii ay ku cadaatay in ay ku sifoobeen xil gudasha la"aan iyo karti daro, wuxuuna Barlamaanku Madaxweynaha ka dalbaday in uu soo magacaabo Raiisul Wasaare soo dhisa xukuumad cusub.

Go"aankaas ka dib waxay ahayd in dalka xukuumad cusub loo dhiso mudo aad u kooban si xukuumadaasi u soo kabto horena ugu wado hawlaha qaranka ee hakadka ku jira.

Nasiib daro, ilaa hada bil iyo bar ka dib, waxaa socda caqabado, iska daba wareeg, wada tashiyo aan dhamaad lahayn iyo dib u dhacyo la gelinayo hawsha laga sugayo Raiisul Wasaaraha cusub, arimahaas oo intooda badan ay hormuud ka yihiin Wasiiradii xukuumadii xilka laga qaaday ee Mudane Saacid.

Hadaba sida uu qabo nidaanka dawliga ahi, eedihiii iyo kalsooni kala noqoshadii Barlamaanka Soomaaliyeed xilka kaga qaaday xukuumadii Mudane Saacid waxay ku wajahnayd oo saamaynaysaa dhamaan xubnihii xukuumadaas ku jirey ee qaas uma ahayn Ra"iisul wasaaraha keliya, suurta galna maaha in Wasiiradii xukuumadaas la ridey faraha la galaan oo wax ka dhisaan xukuumadda cusub ee Ra"iisul Wasaare C/weli Sh. Axmed oo shacabka Soomaaliyeed ka sugayo in ay saxdo dhiliilihii iyo dib-u-dhacyadii ay masuulka ka ahaayeen, ka dibna hore u amba qaado qorshaha soo kabashada iyo horumarinta dalka.

Sidaas awgeed, Mudane Gudoomiye, Anigoo adkaynayna ku dhaqanka sareyna sharciga iyo nidaamka dawliga ah. Fulinta go"aankii Barlamaanka iyo qodobadii dastuurka iyo xeer hoosaadka ee loo cuskaday xilka ka qaadistii xukuumadii Mudane Saacid sida Qodobka 69 Faqradiisa 2-aad xarfaha B iyo E, Qod. 111, 112 iyo qodobka 75-aad ee xeer hoosaadka, waxaanu soo jeedinaynaa in Barlamaanka Soomaaliyeed arintan ka doodo, kana qaato qaraar siyaasi ah oo ah in aan

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 760
TR: 12/1/14

xukuumadda cusub lagu soo darin xubnihii xilka laga qaaday ee xukuumadii Mudane Saacid.

Mahadsanid

***Xildhibaanadda Saxeexay talo soo jeedinta***

1. Dr Said Mahamed Ali
2. Abdirizak Dahir Maxamud
3. Sareedo Mohamed Cabdalla
4. Bishar ugas Ibrahim ugas
5. C/qaadir Sh. Cali Ibraahim (Baqdadi)
6. Mahamed Abdullaa
7. Cibraahin Jaavame Maxamed
8. Dr-Ibrahim S. X. nuur
9. Dr. Abdiaziz Sh. Yusuf (Direed)
10. Maxmed Xasan Ibraahim
11. Mohamed Abdi Hayir
12. MOHAMED OMAR MOHAMUD
13. Aamino omar Jama
14. Mohamed Ahmed Gurxan
15. faysal Cumar Guuled
16. Khalif Mohamed Hagi
17. AHMED ADEN ABDI
18. Cumar Cali Boqor
19. Mohamud Ahmed M. Kulalish
20. faadumo cabdalaa raage
21. Cabdi Cali Xasan

***Xildhibaanadda Saxeexay talo soo jeedinta***

31. [illegible]

32. Mohamed Ismail Shuriye

33. Abdullahi Mohamed Adan

34. Hussein Mohamud Musse

35. Abdullahi Yusuf

36. Cismaan Faddar Dhiirs

37.

38.

39.

40.

41.

42.

43.

44.

45.

46.

47.

48.

49.

50.

51.

52

53

54.